



Caddaynta dakhliga iyo hantida

Magacaaga iyo kan aabbaha
Magaca awoowe
Lambarka DUF

Xeerarka caawinta dhaqaalaha oo ay ku lifaaqan yihiin caawinnada kale ee la bixiyo oo idil waxaad ka helaysaa [«Reglement for økonomiske ytelser til beboere i statlig mottak»](#) (xeerarka lacagta).

UDI-du (Waaxda agaasinta ajnebiga) waxay caawin dhaqaale ku siinaysaa keliya marka aadan haysan wax aad masruufato. Haddii uu dakhli ku soo galo ama aad hanti leedahay waxay taas micnaheedu noqonayaa in aad haysato wax aad masruufato oo kugu wada filan ama bar ahaan kugu filan. Markaa lagu siin maayo caawin dhaqaale, ama waannu dhimaynaa innaga oo u eegeyna inta ay le'eg yihiin dakhligaaga/hantidaada. Haddii uu ku soo galo mushaar ilaa xad le'eg waxaa iyana dhici doonta in lagaa dalbo in aad bixiso kiro guri.

Sheeg haddii uu dakhli ku soo galo ama aad hanti leedahay

Si lagu siiyo caawin dhaqaale oo sax ah, waa in aad xerada qaxootiga u sheegtaa haddii uu dakhli ku soo galo ama aad hanti leedahay. Waxaad taas sheegi kartaa adiga oo saxiixaya caddayntan. Warbixinta waxaa loo isticmaalayaa oo keliya in lagu cabbiro caawinta dhaqaalaha ee lagu siinayo.

Soo gudbi caddaymaha

Marki ay xerada qaxootigu kaa codsato waa in aad keentaa caddaymaha muujinaya in aad weli buuxiso shuruudaha laysku siiyo caawinta dhaqaalaha. Haddii aadan keenin caddaynta ay UDI-du u baahan tahay, waa lagaa joojinayaa caawinta dhaqaalaha ee lagu siiyo.

Waa in aad soo gudbisaa caddaymaha soo socda

- nuqulka warqaddii mushaarka ee u danbaysay, haddii uu dakhli mushaar ah ku soo galo
- nuqulka heshiiska shaqada, haddii uu dakhli mushaar ah ku soo galo
- qoraal laga soo saaray xisaabtaada bangiga (koontadaada) oo caddaynaya lacagti ku jirtay bishi u danbeysay, haddii aad koonto ku leedahay Norway
- qoraal laga keenay mas'uuliyiinta canshuuraadka oo caddaynaya xaaladda canshuureed (skatteoppgjøret) ee sanadki u danbeeyay
- warbixin ka timid NAV oo muujineysa wixii lacago caymis dadweyne ah (trygdeytelser) ee lagu siiyay 12-kii bilood ee u danbeeyay

Caddayn

- Waan fahmay micnaha iyo waxa ku qoran caddaynta, inti tabartayda ahna warbixinno sax ah ayaan bixiyay.
- Xerada qaxootiga waan siiyay warbixinnada la xiriira wixii hanti iyo/ama dakhli ah ee aan leeyahay. Haddii aan hanti iyo/ama dakhli helo inta aan xerada qaxootiga ku jiro, waxaa markaas waajib igu ah in aan taas ku wargeliyo xerada qaxootiga, islamarkaana keeno caddaymaha loo baahan yahay. Waxaa iyana sidaas oo kale ah haddi ay wax iska beddelaan dakhligeyga iyo/ama hantidayda.
- Waan ogahay in booliska laygu dacweyn karo haddii aan si kas ah u bixiyo warbixin khalad ah ama aan qariyo warbixinnada la xiiriira xaaladdayda dakhli iyo/ama middayda hantiyeed.
- Waan ogahay in la dhimi karo ama aan gebigeedba waayi karo caawinta dhaqaalaha ee lay siiyo haddii aan warbixinno khalad ah ka sheego ama aan qariyo warbixinnada la xiriira xaaladdayda dakhli iyo/ama midda hantiyeed.

Taariikh

Sixiixa qofka magangelyadoonaha ah

Sixiixa shaqaalaha xerada qaxootiga